

# Xuquuqdaada ee nidaamka magangalyada



Macluumaadka carruurta iyo dhallinyarada

Buug yarahaan wuxuu kuu micneynayaa:

- ✓ Meesha aad ka heli karto saacidaad/gargaar
- ✓ Waa maxay xuquuqdaadu
- ✓ Siduu u shaqeeyo habka ama nidaamka magangalyada dalka Switzerland
- ✓ Waa maxay wareysiga
- ✓ Xaggeed wax ugu darsan kartaa habraaca magangalyada

## Hel saacidaad / gargaar

Ambalaas: 144  
Booliska: 117



Haddii dhibaatooyin iyo walaac ama stress ku hayaan:

- Pro Juventute: 147
- Caawimaad xagga hoyga/guriga
- Macallimiin

## Wakiilkeyga sharci/Looyar / qof lagu kalsoon yahay

Magac:

Lambar telefon:

Halkan waxaad ka heleysaa macluumaad sa'a'id ah ee habraaca magangalyada



unicef.ch/  
asylumprocedure

unicef   
for every child

mmi 

# Xuquuqda carruurtana waa lugu tixgaliya habraaca magangalyada

Waxaad xaq u leedahay inaad ladan tahay oo caafimaad ku joogtaa.



Waxaad xaq u leedahay inaad sheegto waxa fikraddaadu tahay iyo waxaad u baahan tahay.



Waxaad xaq u leedahay in wax kastoo muhiim kuu ah aad ka hesho macluumaad/informeshan.



Waxaad xaq u leedahay tageero iyo wax barasho.



Xuquuqda dadka da' da yar waxey khuseeyaan carruurta iyo dhallinyarada illaa ay ka gaaraan 18 sano.

Dawladda Switzerland, maamulka, booliska iyo kulli dadka waaweyn, carruur iyo dhallinyaraba waa iney xaqdhowraan xuquuqda dadka da' da yar.

Markaad 18 sano gaarto kaddib adiga iyo dadka waaweyn waxaa idiin soconaya xuquuq al insaanka.

Haddii xuquuqdaada aan la tixgalin, wax wanaagsan ma aha. **U sheeg ama qof kala hadal!**

Soo ogow xuquuqdaada




unicef.ch/  
childrenrights



# Waa kan sida nidaamka magangalyada u shaqeeyo

Soo gelidda Switzerland



## 1 Soo gudbi codsi magangalyo

- Odhaah/af ka sheegid ama qoraal
- Xero federaal ah ee magangalyo, (CFA/BAZ)
- Ama xarunta baarista/kontrolka xuduudda Switzerland



## 4 Go'aan magangalyo

SEM waxey go'aan ka gaareysa magangalyada aad codsatay.

### Go'aan oggolaansho ah

Waad joogi kartaa Switzerland oo magangalyo baad heleysaa.

### Go'aan diidmo ah

Waa inaad ka tagtaa Switzerland.

### Habraaca Dublin

Habraaca magangalyada waa in lugu qabtaa waddan kale ee Yurub ka tirsan.

### Oggolaansho ku meel gaar ah

Haddii waddankaad u dhalatay uusan amni ahayn, waad joogi kartaa Switzerland illaa iyo intii halistu ka dhammaaneyso.

### Racfaan/Abiil

Haddaadadan go'aanka oggolaan waxaad Maxkamadda maamulka federaalka ka diwaan gelin kartaa racfaan ama abiil. Wakiilkaada sharciga ama looyarkaada ama qofka aad ku kalsoon tahay ayaa kaa taageeri kara.



## 2 Marxaladda/Qeybta diyaarinta

- Diwaan gelin iyo baaris/xakameyn xogga shaqsiga, faraha, iwm.
- Wareysiga koowaad ee qaxa ama tahriibka lagaa wareysanayo
- In lugu siiyo looyar/wakiil sharci ama qof lugu kalsoon yahay si lacag la'aan ah

### Wakiil sharci/looyar/qof lugu kalsoon yahay

- Inuu ogeysiyo sida uu u socdo ama horumarka habraaca magangalyada
- Caawimaadda habraaca magangalyada
- U diyaar garowga wareysiga/interview-ga
- Inay kuu raacaan wareysiga ama interview-ga markaad aadeyso

## 3 Wareysi

**Wareysigu** waa wada hadallo lala yeelanayo shaqaalaha SEM. Xitaa wakiilkaada sharci/looyarkaada ama qofka aad ku kalsoon tahay wey ka qeyb galayaan.

**SEM** Xoogheynta socdaalka ee Dawladda wa maamulka Dalka Switzerland ee go'aan ka gaaraya codsiga magangalyadaada.

Inta lagu guda jiro **wareysiga** waxaa lagaa dhageysanayaa sababaha aad u codsaneyso magangalyada, yacni sababta kugu kalliftay inaad soo cararto/baxsato. Waxaa kaloo laga hadlayaa xaaladda aad hadda ku sugan tahay iyo codsi dheeraad ah hadduu jiro.

**Warqad warbixin** ah aya lugu qorayaa hadallada ka soo baxa wareysigaas.

Hadalka carruurta iyo dhallinyarada looma isticmaali karo si loo xaqiijiyo ama caddeeyo sababaha ay waalidkoodu u codsanayaa magangalyada.

Qofka fulinaya wareysiga (SEM)

Turjumaad

Wakiil sharci/looyar / qof lugu kalsoon yahay



### Wareysigeyga (Interview-gayga)

Taariikh iyo saacad:

Meesha/Goobta:

\_\_\_\_\_

\_\_\_\_\_

### Da'da xaqiijinteeda

Mar mar waxaa la suubiya sheybaar lugu hubsanaayo da'da.